SO **2019**

SHARCIGA QOYSKA EE HAWEENKA KUNOOL ONTARIO

Guurka iyo Furniinka

Dhamaan Haweenka. Hal Sharci oo Qoyska.
Baro Xaquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Daabacaadii koobaad oo uu soosaaray:

CCMW
Canadian Council of Muslim Women
Le conseil canadien des femmes musulmanes

Macluumaadkaan waxaa lagu diyaarshay wadatashi lala sameeyay haweenka Muslimiinta ah waxaana loogu talagalay in lagu siiyo haweenka muslimiinta ah macluumaad muhiim ah oo kusaabsan sharciga qoyska ee Ontario maadaama ay qusayso bulshooyinka muslimiinta ah.

Buggaan yar waxaa loogu talagalay in fahan aasaasi ah lagaa siiyo arimaha sharciga. Badel uma aha talobixinta iyo caawimaada sharciga ee gaarka ah. Haddii aad waajahayso arimo laxariira sharciga qoyska, waxaa lagugula talinayaa inaad talo sharci raadsato sida ugu dhakhsaha badan si aad ufahanto dookhyadaada aadna udifaacato xaquuqdaada. Si aad uhesho maclumaad dheeri ah oo kusaabsan sida aad kuheli karto aadna qarash kusiin karto qareenka sharciga qoyska ah, kafiiri buug yaraha FLEW ee aad kahelayso webseetka "Finding Help with your Family Law Problem". Waxaa sidoo kale jiro ilo kale oo macluumaad oo loogu talagalay haweenka muslimiinta ah oo aad kahelayso webseetka FLEW. Si aad uhesho liiska oo dhamaystiran, booqo: www.onefamilylaw.ca

Waa maxay sharciga guurka ee Canada?

Si xaflada guurka ee kadhacaysa Canada unoqoto mid sharci ah, waxaa jiro labo xeer oo ay tahay in labada lamaanabada ay raacaan. Qaybta koowaad ee xeerarka ayaa quseeya cidda sharciyan loo ogolyahay inay guursato. Qaybta labaad ee xeerku waxay kahadlayaan qaabka xafladaada guurka looqabanaayo.

1) Yaa kuguursan kara gobalka Ontario?

Waxaa jiro sharciyo quseeya cidda sharciyan guursan karta iyo cidda aan guursan karin. Halkaan waxaa kuqoran sharciyada ugu muhiimsan ee kahadlaaya cidda sharciyan loo ogolyahay inay guursato:

a) Gobalka Ontario, waxaa qasab ah inaad ugu yaraan **jirto 18 sano** si aad uguursato.
   - Waxaa jiro marar lasoo reebaayo haddii aad jirto 16 ama 17 sano. Waad guursan kartaa haddii aad haysato fasax qoran oo kayimaada labadaada waalid, masuulkaaga sharciga ah, ama Maxkamad.
   - Waxaa jiro sharciyo kaladuwan oo udagsan da'da gobalada kale iyo deegaanada kale.

b) Dhamaan wadanka Canada, **caruurta kayar da'da 16 sano maguursan karaan,** xataa hadii waalidiintoodu ufasaxaan. Waxay kasoo horjeedaa sharciga danbiyada in loo dabaaldago, gacan laga gaysto ama laga qayb qaato xaflad guurka haddii aad ogtahay in mid kamid ah labada qof ee isguursanaaya inuu kayaryahay 16 sano jir.

c) Waxaad guursan kartaa qofkasta oo gaaray da'da guurka. Muhiim maaha nooca jinsi ee ay lamaanuhu noqonayaan.

d) Haddii adigga iyo lamaanahaagu aad qaraabo iskugu dhaw tihiin, dhalasho ahaan ama koriinka waalidka, ma awoodi doontid inaad guursato. Waa sharci daro inaad guursato waalidkaa, waalidkaa waalidkiis, cunugaaga, cunuga aad awoowaha/ayeeyada utahay, walaalka ama walaashaa, walaasha ama walaalka aad halka waalid wadaagtaan.

e) Haddii aad horay xaas ulahayd, maguursan kartid qofkale. Waa sharci daro wadanka Canada inaad guursato wax kabadan hal xaas. Tan waxaa looyaqaanaa **godadlayn**.

- Haddii aad horay xaas ulahayd, waa inaad cadaysaa inaad kala tagteen qofkaas, sababo laxariira inaad isfurteen ama uu dhintay, kahor inta aadan guursan qofkale.
- Haddii aad iskufurteen meel kabaxsan Canada, waa inaad cadaysaa in furniinkiinu ahaa mid sharci ka ah wadankaas. (Waxaa hoos kuqoran macluumaad dheeri ah oo kusaabsan furniinka.)

f) Labadiinaba adiga iyo lamaanahaagu waa inaad fahantaan micnaha la isku guursanaayo. Waa inaad labadiinuba si ikhtiyaari ah u aqbashaan inaad isguursataan. Sharcigaan waxaa looyaqaanaa **"ogolaanshaha lafahmay ee lasharxay"**.
   - Haddii lagugu qasbay inaad guursato, maaha guur sharci ah. Waxay kasoo horjeedaa sharciga danbiyada in loo dabaaldago, gacan laga gaysto ama laga qayb qaato xaflad guur, haddii aad ogtahay in mid kamid ah labada qof ee isguursanaaya uusan doonayn laguna qasbay guurka.

2) Shuruudaha Xaflada Guurka

Qaybta labaad ee xeerka oo kahadlaaya guurka ayaa quseeya sida xaflada guurka loo qabanaayo.

Haddii aad kuguursato gudaha Canada, guurkaagu waa inuu raacaa sharciga gobalka aad kuqabsanayso xaflada guurka.

Labada lamaanaba waa inay kaqaybgalaan xaflada si toos ah. Maaha wax sharci ah in guurka lagu sameeyo wicitaan ama interneetka. Labada lamaanaba waa inay istaagaan horta qofka sharcigu u ogolyahay inuu iskumeheriyo.

Gobalka Ontario, kahor intaadan guursan, waxaa qasab ah inaad hesho **sharciga guurka** oo aad kasoo qaadato xafiiska dawlada ee magaalada caasimada ama maamulka magaalada aad kunooshahay. Shatigu waa mid qiimo jaban. Waxaa qasab ah inaad shatiga ukeento si uu usaxiixo qofka iskukiin meherinaaya, meelkasta oo uu kajoogo Ontario.

Si guurku sharci uga noqdo Ontario, qofka iskukiin meherinaaya waa inuu leeyahay shati ama aqoonsi kahaystaa dawlada. Waxaad iskuguursan kartaan meher diimeed ama mid rayid ah (aan diimeed ahayn) gobalka Ontario.

- **Meherka Diinta:** Hogaanka diinta oo aqoonsiga uhaysta inuu iskumeheriyo dadka Ontario kunool ayaa sifo sharci ah iskukiin meherinaaya, sida Imaanka, Baadariga, Wadaadka Masiixiga, Wadaadka Yuhuuda.

- **Meherka Rayidka ah:** Xaakim, madaxa cadaalada ee nabada, karaaniga magaalada ama qofkale oo shati uhaysta inuu dadka iskumeheriyo oo kusugan Ontario ayaa si sharci ah iskukiin merin kara.

S **Haadadad guurka** waa waraaq rasmi ah oo cadaynaysa inaad sifo sharci ah kuguursatay. Waxaad heli kartaa shahaadada guurka hadii labo qof oo marqati ka ah guurkaaga

ay saxiixaan shatiga guurka, qofka iskukiin merinaayana uu usoo diro shatiga guurka oo lasaxiixay lana buuxiyay una diro xafiiska diiwaanada dawlada. Gobalka Ontario, xafiiska waxaa looyaaanaa Adeegga Ontario.

Guurarka lagu sameeyo wadamada kale sharci makayihiin Canada?

Inta badan, guurarka sharciga ah ee lagu sameeyo dibada wadanka Canada waxaa halkaan looga aqoonsan yahay kuwo sharci ah. Haddii aad kunooshahay wadanka Canada aadna wadan kale u aado inaad soo guursato meherkaaga waa inuu raacaa shuruudaha guurka ee wadanka aad kaguursatay.

Si uu unoqdo guur sharci ka ah Canada, waxaa sidoo kale qasab ku ah inaad raacdo tilmaamaha laxariira cidda loo ogolyahay inay guursato sharciga Canada (kor ayaa lagu sharxay).

Godadlaynta

You should know that having more than one spouse (called "practicing **polygamy**") is against the law in Canada. Haddii aad kaguursatay wadan godadlayntu sharci katahay, kaliya hal guur ood xaas qabto ayaa loo aqoonsanayaa mid sharci ah wadankaan.

Haddii aad usoo guurtay Canada, waxaa jiri kara labadaba cawaaqibyo dhanka danbiga ah iyo cawaaqibyo dhanka socdaalka oo kadhasha guursiga wax kabadan hal xaas. Haddii aad walaac kaqabto sida godadlayntu kuu saamayn karto, qareenka sharciga danbiyada iyo qareenka socdaalka ayaa kucaawin kara.

Inkastoo guurka wax kabadan hal xaas aysan sharci ka ahayn wadanka Canada, hadii xariirka kaala dhexeeya waalid kale ee qof kamid ah caruurtaada uu dhamaado, waxaad wali xaq uleedahay masuuliyada ilmaha, taageerada ilmaha, taageerada xaaska iyo hantida qoyska sida kucad sharciga qoyska ee Ontario.

Guurka Wakiilku Meheriyo
Sida kucad sharciga islaamka, wakiil ayaa lawaydiisan karaa qofka inuu wakiil kanoqdo wadahadalka guurka iyo meherka. Hadii adigga iyo lamaanahaaguba aad xaq uleedihiin inaad iskuguursataan sharciga Canada aadna kuguursataan wadan ogol magacaabista qof wakiil kaanoqda, guurkiina waxaa lagu aqoonsanayaa sharciga Canada.

Haddii aadan hubin in guurkaagu sharci kayahay Canada iyo inkale, ama hadaad su'aalo kaqbto xuquuqdaada iyo xaquuqda caruurtaada, waa muhiim inaad talo sharci kaqaadato qareenka sharciga qoyska.

Si ootomaatig ah miyaan unoqonayaa muwaadin Canadian ah haddii aan guursado qof ah muwaadin Canadian ah?

Inaad guursato muwaadin Canadian ah kuma siinayso muwaadinada Canada si ootomaatig ah. Waxaa jiro hanaano gaar ah oo ay tahay inaad raacdo si aad unoqoto muwaadin Canadian ah iyo shuruudo ay qasab tahay inaad buuxiso si aad ucodsato muwaadinimada.

Majiro hanaan gaar u ah dadka guursada muwaadiniinta Canadian ka ah, laakiin muwaadin reer Canada ah ama qof daganaansho rasmi ah wadanka kuleh ayaa kucasuumi kara lamaanaha inay kunoolaadaan Canada ayagoo daganaansho rasmi ah lasiinaayo.

Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan daganaanshaha rasmiga ah, maalgalinta ama muwaadinimada, kafiiri webseetka Socdaalka, Xaqootiyada iyo Muwaadinimada Canada oo ah https://www.canada.ca/en/immigration-refugees-citizenship.html. Waxaad sidoo kale ka akhrin kartaa buugeena yar "Arimaha Sharciga Qoyska ee Soogalootiga, Xaqootiga iyo Haweenka aan Aqoonsiga lahayn".

Furniinka iyo Kalataga wadanka Canada

Furniinku waa markaad si sharci ah udhamayso guurkaaga. Kalatagu waa marka labo lamaane oo isqaba ama xariir uu kadhexeeyay ayagoon isguursan ay go'aansadaan inay soo afjaraan xariirkooda ayna nolosha kukala tagaan. Haddii aad isqabtaan waad kalatagi kartaan xataa hadiinaan helin furniin sharci ah. Laakiin, hadii xaaskaagu qabo inuu qofkale guursado, waa inaad heshaan furniin sharci marka hore.

Kalataga qoysku waa waqti adag, oo walwal badan. Haddii adigga iyo xaaskaagu isfurtaan ama kalatagtaan, waxaa qasab kugu noqonaysa inaad xalisaan arimo badan oo sharci. Waxay ubadan tahay inaad go'aan kagaartaan taageerada dhaqaalaha, aad heshiisyo kagaartaan caruurtiina, aadna qaybsataan hantida qoyskiina. Xaalad kasta uma baahna qareen, laakiin caqabado badan oo dhanka sharciga qoyska ah, waa muhiim inaad talo sharci hesho.

Haddii aad heshiiskiina kuqortaan heshiiska kalataga, waa muhiim inaad qareen kalahadasho xaquuqdaada, kahor intaadan heshiiska saxiixin. Waxaad kaheli kartaa macluumaad dheeri ah oo kusaabsan Heshiisyada kalataga webseetka FLEW.

Haddii adigga iyo lamaanahaagu kuheshiin karin, ama hadii xariirku yahay ama ahaa mid xadgudub ah, waxaa kuufiican inaad qareen qabsato aadna aado Maxkamad si aad uxaliso arimaha laxarira waalidnimada, taageerada dhaqaale iyo sida looqaybinaayo hantida qoyska.

Lamaanayaasha isqaba waa inay **Amarka Furniinka** kasoo qaataan Maxkamada haddii ay rabaan inay si sharci ah usoo afjaraan guurkooda. Haddii aad isfurtaan, waxaad sidoo kale Maxkamada kacodsan kartaa inay go'aan kagaarto arimaha kale ee sharciga qoyska sida qaybinta hantida qoyska, qarashaadka taageeradaada iyo taageerada caruurtaada, iyo qorshayaasha waalid unoqoshada ku aadan cida haynaysa ilmaha iyo xiliga ay tahay in waalid waqti laqaato ilmaha.

Gobalka Ontario, haddii aad kalatagtaan laakiin iinaan isfurin, wali Maxkamada waad kacodsan kartaa inay go'aan kagaarto inta badan arimahaan, marka laga reebo qaybinta hantida.

Sidee ayaan furniin kuheli karaa Canada?

Si aad ucodsato furniin gudaha wadanka Canada, adigga iyo xaaskaagu waa inaad Canada kunoolaydeen ugu yaraan hal sano, isla marka aad codsanaysaan furniinka. Waxaa qasab ah inaad furniinka kadalbato Maxkamad qaabilsan arimaha sharciga qoyska, adinkoo iskugaynaaya dukumiintiyo looyaqaano **Codsi**.

Codsiga Furniinku wuxuu kabiloowdaa hanaanka Maxkamada wuxuuna sharaxayaa waxa aad kadoonayso in Maxkamadu go'aan kagaarto oo amar kasoo saarto.

Uma baahnid fasaxa xaaskaaga si aad codsiga furniinka udirsato. Midkiin adigga ama lamaanahaaga ayaa codsan kara Codsiga Furniinka. Haddii aad labadiinuba rabtaan sidaas, sidoo kal si wadajir ah ayaad dukumiintigiina ugudbin kartaan. Kan waxaa looyaqaanaa **Codsiga Iskudhafka** ah ee furniinka.

Codsigaaga ayaa kaliya dalban kara furniin, ama waxaad Maxkamada kuwaydiisan kartaa inay go'aan kagaarto heshiiska cida waalidka kamid ah ee ilmaha haynaysa, taageerada caruurta iyo lamaanaha, iyo sida loo qaybsanaayo hantida qoyska iskumar. Waxaad gudbin kartaa codsigaaga adoo adeegsanaaya ama aan adeegsanayn caawimaada qareen.

Si aad furniin uhesho, waa inaad muujisaa in guurkiinu jabay aysana jirin fursad aad iskugu laaban kartaan. Waxaa jira sadex qaab oo arintaan lagu sameeyo:

1. **Noolaanshaha "kalataga iyo Kala fogaanshaha"**
   Qaabka ugu badan ee aad kumuujin karto in guurkaagu jabay waa inaad "kalatagtaan oo aad meelo kaladuwan kunooshihiin" lamaanahaaga ugu yaraan muddo **sanad ah**.

   Waxaad kunoolaan kartaan "kalataga iyo Kala fogaanshaha" xataa haddii aad iskuguri kusii nooshihiin lamaanahaaga, ilaa inta iinaan udhaqmayn sida dad isqaba oo kale. Haddii aad iskudaydo inaad xaliso arinta guurkaaga sanadka aad

kalatagteen, wali waxaa la idiin tixgalinayaa dad kalatagay, ilaa inaad iskusoo laabataan maahee aadna isla noolataan 90 maalmood ama kabadan.

Waxaad codsan kartaa furniinka sida ugu dhakhsaha badan markaad lamaanaha kalatagtaan, laakiin Maxkamadu furniin idin masiinayso ilaa in adigga iyo lamaanahaagu aad kalamaqnaataan hal sano oo kaamil ah maahee.

2. Sinada

Sidoo kale waa macquul inaad hesho ogolaanshaha furniinka hadii labadiina midkood sinaysto. Sinadu waa marka lamaanaha isqaba midkood uu xariir galmo layeesho qof aysan isqabin.

3. Xadgudubka/Naxariis darada

Waxaad codsan kartaa furniin hadii lamaanahaagu uu jir ahaan ama dhimir ahaan yahay qof naxariis daran (xadgudub badan) oodan lasii noolaan karin.

Markay jiraan sababaha sinada iyo naxariis darada, uma baahnid inaad sugto sanad kahor intaan ogolaanshaha furniinka lagu siin. Laakiin waa inaad keentaa cadaynta sinada ama naxariis darada/xadgudubka kiisaska noocaan ah, tan ayaana kadhigaysa kiiska mid dhib badan oo qarash badan.

Mararka qaar hanaanka Maxkamada ayaa noqon kara mid gaabis ah helista cadaymahaana waxay qaadan kartaa muddo aan kayarayn muddada aad kumuujinayso inaad "kalataga

iyo Kala fogaanshaha” kunoolaydeena muddo ugu yaraan hal sano ah. Waa muhiim inaad talo dhanka sharciga ah kahesho qareenka sharciga qoyska si uu kaaga caawiyo fahanka dookha ugu habboon ee xaaladaada.

Furniinka diiniga ah ee Islaamka
Inaad hesho **furniinka diiniga ah ee Islaamka Canada dhexdeeda macnaheedu maaha inaad sifo sharci ah iskufurteen.** Furniinka sharciga ah, waxaa qasab ah inaad tagto Maxkamada Qoyska Canada aadna kasoo qaadataa Amarka Furniinka.

Furniinada lagu sameeyo wadamada kale sharci makayihiin Canada?

Waxaa jiro qaabab kaladuwan oo aad furniin kusamayn karto wadan kale kaasoo laga ogolyahay Canada.

1. Hadii adigga ama lamanahaagu aad kunoolaydeen wadan kale ugu yaraan hal sano kahor intiinaan codsiga furniinka dirsan, kadib hadii furniinka laguu ogolaado, waa laga aqbalayaa wadanka Canada.

2. Hadii qofka codsanaaya furniinka wadanka kale dhexdiisa uu cadayn karo inay “xarir dhab ah oo muuqda laleeyihiin” wadankaas, kadib markaas hadii furniinka la aqbalo, waa laga ogolaanayaa inay sharci tahay wadanka Canada, xataa hadii midkoodna labada lamaane uusan wadanka kunoolayn muddo sanad ah kahor intaysan codsan furniinka.

> Qaababka qaar ee aad kumuujin karto “xariirka dhabta ah ee muuqda” ee aad laleedahay wadan waa hadaad asal ahaan kasoo jeedo wadankaas aadna wadankaas kulaabatay markii xariirkiinu dhamaaday, ama hadi qofka codsaday furniinku uu dhul kuleeyahay ama uu waqti badan kuqaato wadanka siiyay ogolaanshaha furninka.

Hadii ogolaanshahaaga furniinku kayimid wadan kale, waxay saamayn kuyeelan kartaa xaquuqdaada sharci ee qoyska ee taageerada xaaska iyo qaybinta hantida qoysku kuleeyahay Canada. Haddii aad walaacyo kaqabto furniinka lagugu siiyay wadanka kale, waa fikir wanaagsan inaad lahadasho qareenka sharciga qoyska oo kusugan Canada.

Hadii furniinkaaga laga baxsho wadan kale, aadna doonayso inaad qofkale kuguursato Canada, waa inaad keentaa cadaynta furniinkaaga si aad awood ugu yeelato inaad wadankaan qof kuguursato. Si aad sidaan uyeesho, waxaa qasab ah inaad haysato koobiga rasmiga ah ee Amarka Furniinka.

Waxaad sidoo kale ubaana doontaa waraaq kasoo baxday qareen kusugan Canada oo kusugan gobalka ama deegaanka aad doonayso inaad kuguursato, taasoo sheegaysa in furniinkaaga ay tahay in lagu aqbalo sharciga Canada.

Haddii aan Amarka Furniinku kuqornayn af Ingiriis ama af Faransiis, waxaad sidoo kale ubaahan doontaa inaad amarka uturjunto Ingiriis ama Faransiis uuna fasiro turjumaan ogolaansho haysta. Qareenka ayaa arintaan sidoo kale kaacaawin kara.

Kalataga lamaanayaasha sharciga guud

Lamaanayaasha iskula nool xariirka, laakiin doorta inaysan sifo sharci ah iskuhersan, waxaa mararka qaar looyaqaanaa lamaanayaasha “sharciga guud”. Lamaanayaasha sharciga guud waxay xariirkooda kusoo afjari karaan inay kalatagaan. Uma baahnid inaad amar furniin hesho hadiinaan sifo sharci ah iskuqabin.

Gobal kasta wuxuu leeyahay xeerar ugaar ah oo ku aadan cidda loo aqoonsanaayo lamaane “sharciga guud ah”, iyo xaquuqda sharciga qoyska ee ay lamaanayaasha sharciga guud leeyihiin markay kalatagaan. Gobalka Ontario, lamaanayaasha sharciga guud waxay leeyihiin xaquuq gaar ah oo sharciga qoyska ah hadii:

- ay isla noolaayeen si joogto ah muddo 3 sano ah ama kabadan, ama
- haddii ay ilmo iskudhaleen ayna kujireen xariir dagan.

Lamaanayaasha sharciga guud ee kudhaqan Ontario waxay xaq uleeyihiin inay codsadaan qaadista masuuliyada ilmaha ama helitaanka, taageerada ilmaha, iyo taageerada lamaanaha markay kalatagaan. Inkastoo sharcigu aqoonsanaayo xariirada sharciga guud qaabab badan, sharciyada laxariira qaybsiga hantida qoyska marka lamaanaha isqaba ay kalatagaan maqabanayaan lamaanayaasha sharciga guud ee kunool Ontario. Mararka qaar, haddii aad soo afjarayso xariirka sharciga guud, Maxkamada ayaa amar kubixin karta inaad xaq uleedahay inaad qaybsataan hantida qoyska ee aadan adigu mulkiyadiisa lahayn.

Caqabadaha diinta ee ku aadan furniinka iyo dib iskuguursiga

Maxkamada ayaa siin karta ogolaanshaha furniinka lamaanayaasha iskuqabay meherka madaniga ah ama diiniga ah. Laakiin diimaha qaar ayaan aqoonsanayn furniinka qaarna waxay dhahayaan haddii aad iskufurtaan qaab madani ah (aan diini ahayn), inaadan kamid ahaan karin bulshada diinta ama aadan markale kuguursan karin meher diimeed.

Sharciga qoyska ee Canada kuma siinaayo xaquuq laxariirta guurka aad diintaada iskuguursataan. Laakiin qofkasta oo buuxsha shuruudaha sharciga (ee kor lagu sharxay) wuxuu xaq uleeyahay inuu kuguursado meherka madaniga ah wadanka Canada.

Sharciga qoyska ee Canada kuma qasbi karo lamaanahaaga inuu furniin diini ah kusiiyo. Sharciga Canada kama hadlaayo in aan lamaanayaashu adeegsan karin balan qaadka ama diidmada furniinka diiniga ah si ay iskugu dayaan qaabkooda gaarka ah ee ay kuxalinayaan arimaha laxariira sharciga qoyska. Haddii lamaanahaagii hore iskudayaayo inuu kaahor istaago inaad markale kaguursato bulshadaada aad iskudiinta tihiin, Maxkamada ayaa diidi karta inay go’aan kagaarto codsiga sharciga qoyska ee xaaskaagii hore ee xaquuqda waalidnimada, qarashaadka taageerada ama qaybinta hantida.

Maxkamada ayaa sidoo kale amar dulsaar ah saari karta heshiiska furniinka, haddii ay aaminsantahay inaad heshiiska aqbashay sabab laxariirta in xaaskaagu kuugu hanjabay inuu kaahor itaago inaad nin kale guursato oo katirsan bulshada aad isku diinta tihiin.

Tusaalayaasha kiiska:

1. Hassan iyo Sureya waxay iskuguursadeen Canada. Imaamkooda ayaa udiiwaangaliyay inay sameeyaan meher guur gudaha gobalka Ontario wuuna iskumaheriyay. Sureya ayaa gadaal ka ogaatay in Hassan uu wali si sharci ah kuqabo naag kale. Guurkeedu ma sharci baa? May leedahay wax xuquuq ah kalamaane ahaan gudaha Ontario?

   Jawaab: Guurka Sureya ee Hassan maaha mid sharci ka ah Canada. Sharciga Canada ma ogola in dadka horay xaas ulahaa qofkale guursadaan. Tan waxaa looyaqaanaa godadlayn. *Xataa haddii aan guurkeeda Hassan uusan sharci ka ahayn Canada, haday caruur iskudhaleen, Sureya waxay xaq uleedahay inay lawareegto masuuliyada iyo taageerada carurteeda.*

   Laakiin maadaama Sureya aysan sifo sharci ah iskuqabin ninka gudaha Canada, maylaha dhamaan xaquuqaha xaaska kudhaqan Ontario, sida xaqa ah inay qayb kahesho hantida qoyska, hadii ayada iyo hassan kalatagaan. Ayadoo laga fiirinaayo xaaladahooda, waxay wali awoodi kartaa inay sheegato taageerada lamaanaha, waxayna awoodaa inay hesho qayb kamid ah qiimaha hantida Hassan taasoo ay gacanta kasoo gaysatay ilaalinta ama kobcinteeda.

2. Khalid iyo Yasmeen way isqabaan waxayna kunool yihiin Canada. Khalid ayaa wadankiisii hooyo kulaabtay,

Joordan, si uu iskaga furo islaantiisa. Yasmeen maysan ogayn inuu furniin doontay. Furniinku mayahay mid sharci ka ah Canada? Waa maxay xaquuqda Yasmeen leedahay marka laga fiiriyo sharciga Canada?

Jawaab: Furniinku wuxu noqon karaa mid sharci ka ah Canada hadii Khalid joogay Joordan ugu yaraan hal sano kahor intuusan codsan furniinka. Xataa hadaan Khalid joogin Joordan sanad buuxa, haduu cadayn karo in uu haysto "xariir dhab ah oo muuqda" gudaha Joordan, furniinka ayaa wali sharci kanoqon kara Canada.

Lakiin Yasmeen waxay awoodaa inay kadacwooto xaqnimada furniinka waayo waxba kamay ogayn, taasoo keeni karta xaalad aan qumanayn ama cadaalad daro ah.

Hadii furniinka shisheeye sax yahay, Yasmeen waxay lumin kartaa xaqa ay uleedahay inay taageerada lamaanaha kacodsato Ontario iyo qaybinta hantida qoyska. Arintaani waa wax ubaahan inay qareen sharciga qoyska ah wax kawaydiiso isla markaba.

Hadii midkood Yasmeen ama Khalid uu doonaayo inuu qofkale guursado uuna doonaayo in guurka cusub sharci kanoqdo Canada, qofka doonaaya inuu mar kale gursado waa inuu cadeeyaa in furniinka Khalid kasoo qaatay Joordan uu sidoo kale sax kayahay Canada.

Waxaa jiro ilo kale oo macluumaad ah oo loogu talagalay haweenka muslimiinta ah oo aad kahelayso webseetka FLEW. Si aad uhesho liiska oo dhamaystiran, booqo: http://www.onefamilylaw.ca/en/muslimwomen/.

Waxaa jiro halis wayn oo rabshad keeni karta marka xariirka caga juglaynta ah dhamaanaayo. Haddii aad kujirto halis degdeg ah, wac 911. Hadii adigga ama qof aad taqaano kujiro halis, booqo webseetka FLEW si aad uga hesho macluumaad kusaabsan raadinta taageero.

Haddii aad tahay haweeneey kuhadasha afka Faransiiska oo kunool Ontario, waxaad xaq uleedahay inaad hesho adeegyada luuqada Faransiiska markay socdaan dacwadaha maxkamada sharciga qoyska. Wixii macluumaad dheeri ah oo laxariira xaquuqdaada, laxariir qareen, xarun caafimaadka sharciga ah, ama laynka taageerada Femaide oo ah 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Waxaa macluumaad dheeri ah kaheli kartaa sida aad kuheli karto adeegyada luuqada Faransiiska ee webseetka oo ah www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Fikradaha lagusoo bandhigay macluumaadkaan waa fikradaha FLEW qasabna maaha inay matalaan fikradaha Gobalka.

Inkastoo maalgalinta ay kubixisay Laanta Sharciga ee Ontario, mawduucyada kuqoran daabacaadaan qasab maaha inay noqdaan kuwa Haayada.

Mawduucyada Sharciga Qoyska oo kuqoran Ingiriis*

1. Alternative Dispute Resolution and Family Law (Xalinta Khilaafaadka KalaDuwan iyo Sharciga Qoyska) (SO 001)
2. Child Protection and Family Law (Dhawrista Cunuga iyo Sharciga Qoyska) (SO 002)
3. Child Support (Taageerada Cunuga) (SO 003)
4. Criminal and Family Law (Sharciga Dembiyada iyo Qoyska) (SO 004)
5. Child Custody and Access (Heelida Xannaanada iyo Caruurta) (SO 005)
6. Domestic Contracts (Heshiisyada Gudaha) (SO 006)
7. Family Law Arbitration (Sharciga Qoyska iyo xalinta khilaafaadka) (SO 007)
8. Family Law Issues for Immigrant, Refugee and Non-status Women (Sharciga Qoyska ee Soogalootiga, qaaxootiga iyo haweenka aan sharciga lahayn) (SO 008)
9. Finding Help with your Family Law Problem (Caawimaada Raadinta Sharciga Qoyska) (SO 009)
10. How Property is Divided in Family Law (Sharciga Sheegaya Sida Hantida U qaybsanayaan Qoysku) (SO 010)
11. Marriage and Divorce (Guurka iyo Furniinka) (SO 011)
12. Spousal Support (Caawimaada Xariirka) (SO 012)

* *Buugaagta macluumaadku waxay kuqoranyihiin qaabab iyo luuqado badan. Fadlan booqo www.onefamilylaw.ca si aad macluumaad dheeri ah uhesho. Waxaad sidoo kale kaheli kartaa macluumaad dheeri ah webseetka si ay kaaga caawiyaan inaad fahanto xaquuqdaada sharciga qoyska.*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

The Law Foundation of Ontario

Funded by: /Financé par:
Ontario